

Miisaaniyadda 2026: Xoojinta waxa muhiimka ah

Febraayo 26, 2026

Miisaaniyadda 2026 waxay xoojinaysaa waxa muhiimka ah – bulshooyin adkaysi leh, dhaqaale kala duwan, iyo fursado taageera shaqooyinka isla markaana kobciya faa’iidada Alberta.

Miisaaniyadda 2026 waxay ku jirtaa balaayiin doolar oo maalgashi ah si loo xoojiyo dhaqaalaha Alberta.

Alberta waxay sii waddaa inay hoggaamiso Canada marka la eego celceliska dakhliga toddobaadlaha ah, wax soo-saarka guud ee qofkiiba (GDP per capita), iyo maalgashi ganacsi oo xooggan. Si kastaba ha ahaatee, qoysasku weli waxay dareemayaan cadaadiska kororka qiimaha nolasha, gaar ahaan qiimaha cuntada iyo tamarta oo sare u kacay, taas oo ay sabab u tahay kororka tirada dadka iyo hubanti la’aanta suuqa caalamiga ah.

Dowladda Alberta waxay qaadaysaa hab nidaamsan oo masuuliyad leh si loo ilaaliyo shaqooyinka, loo taageero bulshooyinka, loona xoojiyo saldhigyada kobaca dhaqaale ee muddada dheer. Miisaaniyadda 2026 waxay diiradda saaraysaa abuurista shuruudo soo jiita maalgashi, tababarka shaqaale xirfad leh oo badan, taageeridda degmooyinka, iyo horumarinta si masuuliyad leh waaxda tamarta Alberta.

“Miisaaniyadda 2026 waxay diiradda saaraysaa ka caawinta reer Alberta inay helaan shaqooyin wanaagsan iyo hubinta in carruurteenu ay mustaqbalka helaan fursado ka sii ballaaran. Anagoo taageerayna ganacsiyada maalgashanaya halkan, xoojinayna degmooyinkeenna, isla markaana qaadanayna go’aanno maaliyadeed oo nidaamsan oo masuuliyad leh, waxaan dhisaynaa shuruudaha lagu gaaro xasillooni iyo guul waarta.”

Nate Horner, Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda iyo Wasiirka Maaliyadda

Qodobbada Muhiimka ah ee Miisaaniyadda 2026:

Taageeridda shaqaale xooggan oo karti leh

Miisaaniyadda 2026 waxay ka caawinaysaa soo jiidashada iyo horumarinta shaqaale xirfad leh oo Alberta u baahan tahay, iyadoo ay ka mid yihiin:

- \$115 milyan sanadka 2026–27 oo loogu talagalay barnaamijyada xirfadaha iyo tababarka, iyo hindiseyaasha shaqaalaha si loo soo jiito loona horumariyo shaqaale xirfad leh oo daboolaa baahida dhaqaale sii kordhaya.

- \$246 milyan sanadka 2026–27 oo loogu talagalay Adeegyada Shaqada iyo Shaqo helidda (Career and Employment Services), oo ay ku jirto kordhin \$80 milyan ah, si loo caawiyo dad badan inay helaan una sii haystaan shaqooyin faa'iido leh.
- \$125 milyan, ama \$385 milyan saddex sano gudahood oo loogu talagalay Barnaamijka Deeqda Shaqaalaynta Hal abuurka (Innovation Employment Grant Program), si loo taageero ganacsatada tiknoolajiyadda inay kobciyaan shirkado cusub oo abuura shaqooyin cusub.
- \$8 milyan saddex sano gudahood si loo dhiso shaybaar cusub oo DNA ah, taas oo dedejin doonta baaritaannada iyo dacwad oogista, isla markaana yareyn doonta ku tiirsanaanta shaybaarka qaranka ee RCMP.
- \$2.1 bilyan sanadka 2026–27 si loo sii wado taageerada daryeelka carruurta ee la awoodi karo, si waalidiin badan ay u raadsan karaan tababar, waxbarasho iyo fursado shaqo.

“Anagoo maalgelinayna mustaqbalkeenna isla markaana kobcinayna dhaqaalaha, dowladda Alberta waxay sii ilaalinaysaa Alberta inay noqoto meesha ugu fiican ee lagu noolaado, laga shaqeeyo, laguna koriyo qoys. Waxaan ka caawinaynaa ganacsiyada inay koraan oo ay dhoofiyaan, soo jiidanaynaa shaqaale xirfad leh, hormarinaynaa hannaan socdaal (immigration) oo waara kana tarjumaya danaha Alberta, taageeraynaa goobaha shaqo ee ammaan, caddaalad iyo caafimaad leh, isla markaana dhisaynaa bulshooyin xooggan oo soo dhoweyn leh oo ku baahsan guud ahaan gobolka.”

Joseph Schow, Wasiirka Shaqooyinka, Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Socdaalka

Waxbarashada Sare iyo Tababarka Xirfadaha

Miisaaniyadda 2026 waxay diiradda saaraysaa kobcinta shaqaale xirfad sare leh iyadoo ay ka mid yihiin:

- \$2.7 bilyan oo loogu talagalay hawlaha waxbarashada sare sanadka 2026–27, taas oo ah kordhin \$148 milyan marka loo eego 2025–26, si nidaamka waxbarashada sare ee Alberta uu u sii wado casriyeynta iyo horumarinta, isla markaana u ahaado mid la heli karo oo la awoodi karo.
- \$353 milyan oo taageero ah saddex sano gudahood si loo ballaariyo diiwaangelinta barnaamijyada bartilmaameedka leh, iyo \$148 milyan dheeraad ah saddex sano gudahood si loo kordhiyo awoodda iyo kuraasta cusub, gaar ahaan barnaamijyada baahida sare leh sida injineerinka, daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada.
- \$83 milyan saddex sano gudahood si loo taageero labanlaabidda ardayda ku jira barnaamijka Daawada Xoolaha ee University of Calgary.
- \$1.3 bilyan sanadka 2026–27 si loo caawiyo ardayda Alberta inay helaan waxbarasho sare iyada oo loo marayo amaahyo, deeqo, deeqo waxbarasho (scholarships) iyo abaalmarinno. Tani waxaa ka mid ah:
 - \$100 milyan oo loogu talagalay taageerada waxbarashada aasaasiga ah iyada oo loo marayo deeqo gargaar.
 - \$96 milyan oo loo marayo Deeqda Tababarka Barnaamijyada Farsamada (Apprenticeship Learning Grant) si loo daboolo baahida kordhaysa ee kuraasta

tababarka farsamada. Tirada ardayda farsamada diiwaangashan ayaa gaartay rikoor ka badan 78,000.

- \$75 milyan oo deeqo arday ah iyo \$36 milyan dheeraad ah oo deeqo waxbarasho iyo abaalmarinno ah.
- \$887 milyan oo amaah arday ah oo leh dulsaarka hoose iyo shuruudo dib-u-bixin oo fudud si loo fududeeyo kharashaadka waxbarashada sare.
- \$1.8 bilyan saddex sano gudahood oo loogu talagalay xarumaha waxbarashada sare (mashaariic dhisme, dayactir iyo cusboonaysiin), si loo kordhiyo awoodda ardayda loona horumariyo shaqaale xirfad leh. Tani waxaa ka mid ah:
 - \$384 milyan saddex sano gudahood oo loogu talagalay Xarunta Xirfadaha Sare ee NAIT si loogu daro 5,500 boos waxbarasho.
 - \$7 milyan maalgelin cusub oo loogu talagalay horumarinta xarunta xoolaha ee Lakeland College.
 - \$5 milyan qorsheynta ballaarinta barnaamijyada caafimaadka ee Bow Valley College.
 - \$2 milyan qorsheynta Xarunta Fayoqabka Bulshada ee Medicine Hat College.
 - \$160 milyan saddex sano gudahood oo lagu horumarinayo Xarunta Isku-dhafaan (Multi-Disciplinary Hub) ee University of Calgary si arday badan ay u helaan STEM (saynis, tiknoolajiyad, injineerin iyo xisaab).
 - \$90 milyan laba sano gudahood oo loogu talagalay dhismaha cusub ee Dugsiga Ganacsiga ee MacEwan University si loo qaado ilaa 30,000 arday.
 - \$70 milyan laba sano gudahood oo loogu talagalay dib-u-habaynta Xarunta Cilmiga Bayoolojiga ee University of Alberta si loo bixiyo ku dhowaad 3,200 boos barnaamijyo baahida sare leh.
 - \$35 milyan laba sano gudahood oo loogu talagalay Dugsiga Waxbaridda Caafimaadka ee Miyiga ee University of Lethbridge si loo taageero tababarka xirfadlayaasha caafimaadka ee koonfur-bari Alberta.
 - \$483 milyan saddex sano gudahood oo loogu talagalay dayactirka iyo cusboonaysiinta dhismayaasha waxbarashada sare.

“Dhaqaale xooggan wuxuu ka bilaabmaa nidaam waxbarasho sare oo adag. Miisaaniyadda 2026 waxay maalgelin ku samaynaysaa barnaamijyada, goobaha tababarka iyo kaabayaasha jaamacadaha ee loo baahan yahay si ardayda Alberta loogu diyaariyo shaqooyinka maanta iyo kuwa mustaqbalka. Waxaan kordhinaynaa awoodda barnaamijyada baahida sare leh, taageeraynaa tababarrada farsamada (apprenticeships), isla markaana ilaalinaynaa in waxbarashadu ahaato mid la heli karo oo la awoodi karo sababtoo ah marka reer Alberta guulaystaan, gobolkeenna ayaa guulaysta.”

Myles McDougall, Wasiirka Waxbarashada Sare

Taageeridda Bulshooyinka

Miisaaniyadda 2026 waxay maalgelinaysaa bulshooyin xooggan oo adkaysi leh iyadoo la gelinayo \$7.1 bilyan si loo taageero baahiyaha kaabayaasha deegaanka sida waddooyinka, nidaamyada biyaha, buundooyinka iyo xarumaha bulshada ee muhiimka ah, oo ay ka mid yihiin:

- \$2.6 bilyan saddex sano gudahood si loo sii wado Qaab-dhismeedka Maaliyadeed ee Dowladaha Hoose (Local Government Fiscal Framework), kaas oo siinaya degmooyinka maalgelin deggan oo la saadaalin karo, oo ay ku jirto \$563 milyan Edmonton iyo \$808 milyan Calgary.

- \$66 milyan si loo beddelo Buundada Smith ee ku taalla M.D. of Lesser Slave River, taas oo hagaajin doonta isu-socodka warshadaha deegaanka iyo dadka ku nool gobolka Slave Lake.
- \$39 milyan oo loogu talagalay adeegyada goobta si loo taageero horumarinta Innovation Park ee Beaumont.
- \$103 milyan mashaariic ka hortag abaar iyo fatahaad ah si loo xoojiyo adkaysiga muddada dheer ee bulshooyinka.
- \$38 milyan oo loogu talagalay maalgashi ka hortagga iyo la-dagaallanka dababka kaymaha (wildfire), si loo sii wado ballanqaadka gobolka ee ka hortagga iyo jawaabta degdegga ah.
- Qodobkan kuma jiraan maalgelinta raasamaalka ee shan diyaaradood oo dab-damis (air tankers), maadaama la filayo in keenistoodu bilaabato 2031; sidaas darteed, maalgelinta waxaa lagu dari doonaa qorshayaasha raasamaalka mustaqbalka.
- \$19 milyan oo loogu talagalay badbaadada dadweynaha iyo kaabayaasha xaaladaha degdegga ah, oo ay ku jirto nidaamka isgaarsiinta Alberta First Responders Radio Communications System iyo kormeerka deegaanka.
- \$21.2 milyan saddex sano gudahood si loo ballaariyo barnaamijka kormeerka elektaroonigga ah (electronic monitoring), si loo kordhiyo amniga bulshooyinka.

“Miisaaniyaddan waxay ka tarjumaysaa go’aannada adag balse masuuliyadda leh ee loo baahan yahay xilliyada caqabadaha dhabta ah. Anagoo ilaalinayna maalgelinta adeegyada muhiimka ah isla markaana fulinayna ballanqaadyadeenna, waxaan sii wadaynaa taageeridda bulshooyinka maanta, annagoo dhiseyna mustaqbalka.”

Dan Williams, Wasiirka Arrimaha Degmooyinka

Tamarta, dhuumaha shidaalka iyo horumarinta kheyraadka

Miisaaniyadda 2026 waxay ka caawinaysaa in Alberta sii ahaato hoggaamiye caalami ah oo ku saabsan soo saarista tamar masuuliyad leh oo lagu kalsoonaan karo, iyadoo ay ka mid yihiin:

- \$15 milyan sanadihii 2025–26 iyo 2026–27 si loogu qabto shaqo qorsheyn hore ah oo lagu hormarinayo dhuun shidaal (oil pipeline) oo gaara Xeebta Galbeed (West Coast). Tani waxaa ku jira qiyaasta kharashaadka iyo wada-tashiyo si loo diyaariyo soo jeedin lagu kalsoonaan karo oo federaalka loo gudbiyo.
- Maalgelin loogu talagalay hagaajinta nidaamyada si loo hirgeliyo barnaamijka Bitumen Royalty In Kind.
 - Waxaa loo baahan yahay cusboonaysiin nidaam si barnaamijkani uga caawiyo gobolka inuu helo qiimaha ugu sarreeya ee suurtoogalka ah ee saliidda caalamka isla markaana dhiirrigeliyo maalgashiga gaarka loo leeyahay.
- \$530,000 si loo sii wado la-tashiyada lala yeelanayo dadka Alberta ee ku saabsan tamarta nukliyeerka, isla markaana loo horumariyo khariidad-hawleed goboleed iyo qaab sharciyeed (regulatory framework).
- Dowladda Alberta waxay bilaabi doontaa iibinta Renewable Energy Credits si loo daboolo qayb yar oo ka mid ah khasaaraha ka dhashay Barnaamijka Tamarta La Cusboonaysiin Karo (Renewable Energy Program) oo ay soo bandhigtay dowladdii hore.

“Dhaqaalaheenna waxaa kaxeeya saliidda iyo gaaska aan si masuuliyad leh u soo saarno, baahida caalamiguna waligeed ma aysan noqon mid ka sarreysa ama ka muhiimsan sida maanta. Maalgelinta aan ku samaynayno waaxda tamarta ee Miisaaniyadda 2026 waxay xaqiijin doontaa inaan awoodno inaan dhisno isbitaallo, dugsiyo iyo waddooyin, isla markaana aan ku quudinno (tamarsiino) gobolkan jiilal badan oo soo socda.”

Brian Jean, Wasiirka Tamarta iyo Macdanta

Taageeridda ganacsiga iyo kala-duwanaanshaha dhaqaalaha

Miisaaniyadda 2026 waxay sii waddaa kala-duwanaanshaha dhaqaalaha Alberta iyo ballaarinta fursadaha ganacsiyada iyadoo ay ka mid yihiin:

- \$9 milyan saddex sano gudahood oo loogu talagalay Barnaamijka Warshadaha Iskaashatada ee Farsamaynta Abuurka si loo casriyeeyo kaabayaasha duugoobay, qalabka iyo tiknoolajiyadda xarumaha farsamaynta abuurka (seed processing facilities).
- \$4.6 milyan saddex sano gudahood si loo horumariyo loona dayactiro shabakadda waddooyinka iyo buundooyinka ee ay leedahay gobolka, kuwaas oo isku xira degmooyinka iyo bulshooyinka guud ahaan Alberta, isla markaana taageera socodka ammaan iyo hufan ee gaadiidka warshadaha, ganacsiga iyo rakaabka.
- \$129 milyan sanadka 2026 oo loogu talagalay horumarinta dhaqaalaha iyo ganacsiga, si loo taageero soo jiidashada maalgashiga loona xoojiyo ganacsiga gudaha iyo kan caalamiga ah.

Maalgelinta Ganacsiga iyo Warshadaha

Miisaaniyadda 2026 waxay taageeraysaa kobaca ganacsiga, soo jiidashada maalgashiga iyo tartandheer oo waara iyadoo loo marayo:

- \$25 milyan saddex sano gudahood si loo taageero mashaariic ay hoggaaminayaan bulshada asaliga ah (Indigenous-led projects) iyada oo loo marayo Hindisaha Dib u heshiisiinta Indigenous iyo Sanduuqa Maalgashiga Ganacsiga Asaliga ah (Aboriginal Business Investment Fund).
- \$20 milyan oo loogu talagalay taageerada ganacsiyada yaryar iyo horumarinta dhaqaalaha gobollada si loo dhiirrigeliyo kobaca deegaanka iyo abuurista shaqooyin.
- \$385 milyan saddex sano gudahood oo loogu talagalay Barnaamijka Deeqda Hal-abuurka iyo Shaqaalaynta (Innovation and Employment Grant), kaas oo siinaya ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah cashuur-celin (refundable tax credits) ku saabsan maalgashiga u qalma ee cilmi-baarista iyo horumarinta gudaha gobolka.
- \$15 milyan saddex sano gudahood si loo taageero Qorshaha Guud ee Tareennada Rakaabka (Passenger Rail Master Plan) si loo horumariyo shabakad tareen rakaab.
- \$76 milyan oo maalgashi ah oo loo marayo Travel Alberta si loo abuurto shaqooyin loona taageero ganacsiyada qoysaska iyo kuwa dalxiiska ee ay hoggaamiyaan bulshada asaliga ah, taas oo kobcinaysa dhaqaalaha deegaanka.
- \$4 milyan si loo sameeyo dayactir weyn oo lagu sameeyo dhabaha diyaaradaha iyo goobaha apron ee Garoonka Diyaaradaha Cooking Lake.
- \$39 milyan saddex sano gudahood si loo taageero adeegyada goobta ee horumarinta Innovation Park ee Beaumont.

- \$87 milyan saddex sano gudahood oo loogu talagalay Barnaamijka Dhiirrigelinta Petrochemical-ka Alberta (Alberta Petrochemicals Incentive Program – APIP), si loo soo jiito maalgashi loona xoojiyo kaalinta Alberta ee soo saarista petrochemical-ka caalamka.
- o Ilaa hadda, dowladda Alberta waxay ballanqaadday \$647 milyan shan mashruuc oo waaweyn, kuwaas oo matalaya \$9.1 bilyan maalgashi gaar loo leeyahay oo ku saabsan petrochemical, hydrogen iyo shidaal macmal ah (synthetic fuels).
- \$225,000 sanadka 2026–27 si loo abuurdo Xafiiska Golaha Maalgashiga ee Ra'iisul Wasaaraha (Premier's Investment Council Secretariat), si loo helo hannaan mideysan oo istiraatiiji ah oo lagu soo jiito maalgashi guud ahaan waaxyaha dowladda iyo hay'adaha la-hawlgalayaasha, isla markaana si wanaagsan loola socdo mashaariicda waaweyn ee maalgashiga.

Miisaaniyadda 2026 waxay diiradda saaraysaa waxa muhiimka ah iyadoo maalgelin bartilmaameed leh lagu sameynayo ardayda iyo fasallada, daryeelka caafimaadka iyo dhaqaalaha, isla markaana muujinaysa hoggaan maaliyadeed oo adag iyo xakameyn kharashaadka.

Macluumaad la xiriira

- Miisaaniyadda 2026

Weydiimaha warbaahinta

Marisa Breeze

Marisa.Breeze@gov.ab.ca

780-235-4427

Xoghayaha Sare ee Warfaafinta, Guddiga Maaliyadda iyo Wasaaradda Maaliyadda

Josh Aldrich

Josh.Aldrich@gov.ab.ca

780-427-3740

Xoghayaha Sare ee Warfaafinta, Tamarta iyo Macdanta

Hunter Baril

Hunter.Baril@gov.ab.ca

780-644-8554

Xoghayaha Warfaafinta, Shaqooyinka, Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Socdaalka

Jack Alarie

Jack.Alarie@gov.ab.ca

780-427-3744

Xoghayaha Warfaafinta, Arrimaha Degmooyinka

Neil Singh

Neil.Singh@gov.ab.ca

780-644-7353



Xoghayaha Warfaafinta, Waxbarashada Sare

War saxaafadeed